Qorshe cusub oo koors waxbarasho oo loogu talo galay dhigista af iswidhishka ee dadka soo galeytiga ah (sfi)

Ujeeddeda waxbrashada

Luqaddu waxay furtaa daqaad adduunka ah. Luqaddu waxay ka turjuntaa kala duwenaanshaha iyo isku mid ahaanshaha u dhaxeeya dadka, qofnimadooda, asalkoodii hore iyo danahooda. Dhigista luqadda iswidhsihka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah ee sfi:ga waxay siisaa ardayda luqaddooda hooyo aanay iswidhish ahayn fursad ay ku bartaan oo uay hore ugu mariyaan luqad cusub oo si fiican u shaqaynaysa. Taas xitaa waxa ka mid ah ku dhawaaqid fiican oo erayada ah, maadaama ay xidhiidh aad fiican la leedahay khibradda iyo aqoonta cilmiyeed ee isgaadhsiinta. Si ugu dhaqaaqidda erayada waxa ku jira oo ka mid ah weliba qaafiyadda iyo laxaniga. In hore loo mariyo awoodda xirfadeed ee luqadda cusubi waxay keentaa isku kalsoonida gaar ahaaneed, badbaadada xaaladaha kala duwen iyo fursadda qofku hore ugu marinayo qofnimadiisa. Qofka asalkiisii hore iyo waayo aragnimadiisa xagga dhaqanka ayaa noqonaysa tacbiirta sida luqadda loo isticmaalo. Waa muhiim in la abuuro ogaansho luqadeed iyo fahanka ah sidii luqadda loogu isticmaali kari lahaa xidhiidho kala duwen. Waxbarashadu waxay shuruudo u keenaysaa barashada luqadda noocan ah ee ay ardaydu uga faa'iideysan lahaayeen una dhuuxi lahaayeen waxbarashadooda isla markaana uga qayb qaadan lahaayeen nolosha bulshada iyo shaqada. Waxbarashadu waxay hore u marin doontaa aqoonta sidii qofku u baran lahaa luqadda.

Sfi:gu ugu horrayn waxa weeyi waxbarasho luqadeed oo tayo sare leh, taas oo isgaadhsiintu ay tahay micnaha ama ujeeddeda dulucda. Waxbarashadu waxay ka bilaabmaysaa danta uu leeyahay ardayga gaarka ahi, shuruudaha iyo baahida. Waxa qiimayn lagu sameeyaa baahida iyada oo la kaashanayo oo lala xidhiidhayo ardayga isla markaana qiimaynta ayaa la kaydiyaa iyada oo faa'iido ah. Doorashada dhabta ah ee qoraalka waxbarashada, wada hadalka iyo wada xaajoodyadu waxay ka bilaabmaan heerka kooraska waxbarasho ee markaas la dhiganayo waxayna u qaataan kuwaas sidii beebkii cilmiga kaas oo ku saabsan fahanka bulshada ku wareegsan. Waxay ahaanaysaa dheellitir u dhaxeeya waxbarashada luqadda iyo aqoonta waxbarasho ee ku saabsan fahanka bulshada oo weliba waxbarsho ahaan loo bixinayo.

Waxa aad muhiim u ah in ardayda la siiyo dhammaan fursadaha sidii ay ugu tababaran lahaayeen luqadda iswidhishka nolosha shaqada sfi:gana loogu kabi lahaa hawlaha kale ee firfircoonida ah, tusaale ahaan; isku dubbaridka nolosha shaqada, ansaxinta, tababarka ama waxbarasho kale. In sfi:ga la raaciyo oo lagu kabo shaqo qofka wax ka soo galaan mustaqbalka ayaa badanaa shuruud u ah sidii qofku uga qayb qaadan lahaa waxbarashada. Taasna waxa loola dan leeyahay aasaaska muhiimka ah, ee waxbarashadu in ay tahay mid sidii la rabo oo baddeli karo lana waafajin karo qofka gaarka ah.

Dhismaha waxbarashada

Waxbrashadu waxay ka kooban tahay saddex marxaladood oo kala duwen oo ah, Sfi 1, Sfi 2, iyo Sfi 3, kuwaas oo ku waajahan ama loogu talo galay dadka uu kala duwenaa aasaaskoodii hore, shurruddooda iyo hadfkooduba. Sfi 1 wuxu ka kooban yahay korasyada A iyo B, Sfi 2 wuxu ka kooban yahay korasyada B iyo C iyo Sfi 3 oo ka kooban koorasyada C iyo D. Dhabba kasta oo waxbarasho waxay ka kooban tahay laba kooras oo waxbrasho oo muujinaya horumarka waxbarashada dhexdeeda laga gaadhay. Taas awgeed ardaydu

waxay helaan fursad ay ku qorsheeyaan waxbarashadooda iyaga oo adeegsanaya hadefka lagu gaadhi karo wakhti macquul ah.
Laba ka mid ah koorasyada waxbarashada waxa ku jira in ka badan hal dariiqo oo waxbarasho.Taas oo ku xidhan dhabbaha waxbarashada ayaa mid kasta oo ka mid ah koorasyada waxbarasho loogu talo galay dadka dhawaanta bilaabay ama koorasyada waxbarashada lagu sii wato uu hadafkooda wxbarasho isku mid yahay, laakiin koorasyadu sidoodaba qaabkood wuu kala duwen yahay taas oo ku xidhan aqoonta ardayga ee afka iswidhishka marka la bilaabayo koorsaka waxbarashada iyo dhabbaha waxbarasho ee la doortay. Qiimaynta la samaynayo ee marka la eegayo heerka uu ardaygu waxbarashooyinkiisa uu ka bilaabi karo waxay ka bilaabmaysaa qiimayn lagu samayo qofka aqoontiisa, iyada oo loo eegayo waxa muhiim u noqon kara fursadaha lagu gaadhi karo hadefka. Maaddaama fursadda lagu dhammaynayo waxbarashada sfi:da ka dib koorasyada kale ama dhabbooyinka waxbrasho, ayaa qorshihii loogu talo galay sidii arday walba loo gaadhsiin lahaa fursad uu wax ku sii barto ilaa kooraska waxbarasho ee D.
Barashada akhriska iyo qoraalka micnihiisu waxa weeyi in dadka aan waxbarasho hore lahayni ay bartaan akhriska iyo qoritaanka. Barashada akhriska iyo qoraalka micnihiisu waxa weeyi oo kale in dadka waxbarashadoodu ay gaaban tahay ee aan luqaddoodu adkayn in ay helaan fursad ay si qoto dheer ugu sii bartaan aqoontooda ay mid toos ah uga dhigi lahaayeen. In qofku uu waxbarashada aasaas ahaan barto waxay qaadanaysaa in muddo ah. Barashada qoraalka iyo akhrisku waxay xitaa khusayn kartaa dadka suugaanyahanka ah ee qoraalka afkoodu si kale u qoran yahay sidaas awgeedna ay khasab tahay in ay bartaan xuruufta laatiiniga ah si waaga dambe ay u akhriyi karaan una qori karaan. Marka dame habka waxbarashadu waxay noqon kartaa mid ka duwen sidaas oo si kale u eeg. Barashada qoraalka iyo akhriska laguma xidhayo mid ka mid ah koorasyada waxbarasho ee A-D, ee waxa laga bilaabayaa qaybtiisa, kaas oo si gooni ah loo dhigan karo ama la raacin karo mid kale oo koorasyada ka mid ah. Waa nidaam socon kara ilaa inta muddeda waxbarashada sfi:gu ay socoto, si loo halo in awoodda wax qabad mid otomaatig ah laga dhigo. Waxbarashadu xitaa waxay ku socon kartaa luqadda hooyo ee ardayga ama luqad kale, waana in xitaa ay barbar socotaa waxbarashada iswidhishka.

Hadefka

Hadefka laga leeyahay dhigista luqadda iswidhsihka ee loogu talo galay dadka soo galeytigu waxa weeyi sidii ardaydu ay hore ugu marin lahaayeen
– awooddooda akhriska iyo qoritaanka ee iswidhishka,
– awooddooda hadalka, cid kale la hadalka, akhriska, dhageysiga iyo fahanka iswidhishka ee xidhiidhada kala duwen,
– si fiican ugu dhawaaqidda erayada,
– awooddooda isticmaalka qalabka saxda ah ee la adeegsado,
– awooddooda waafajinta luqadda dadka iyo xaaladaha kala duwen,
– fikradaha ah sida loo barto luqadaha iyo
– istaratajiyadda barashada iyo isgaadhsiinta ku saabsan horumarka luqaadda qofku sii wadanayo.

Qiimaynta iyo darajeynta shahaadedda

Waxa aasaas u ah qiimaynta

Qaybtan waxbarashada dhexdeeda ee khusaysa barashada akhriska iyo qoridda laguma dhigo shahaadedda. Koorasyada waxbarasho ee A-D waxa la sameeyaa shahaaded ka dib marka uu dhamaado kooraska waxbrashadu. Qiimayntu waxay koobeysaa aqoonta ardayda marka la tix raaco hadefyada. Qiimaynta ku salaysan heerarka summadaha ee shahaadedaha waxa lala xidhiidhinayaa heerarka kooraska waxbarasho iyo waxyaabaha ay ka kooban yihiin iyo waxyaabaha lagu ansaxiyey sharraxaadda korasyadu sida ay iskugu xigaan.

Qiimaynta sfi:gu waxay khusaysaa

– sida ay ugu kala gaddisan yihiin, fahan ahaan iyo kala duwenaanshaha xagga tacbiirta ardayda ee hadalka iyo qoraalka
– Sida ay ardaydu si fiican u waafajiyaan luqadda dadka lala hadlayo iyo xaaladda,
– Awoodda fahanka ee qaybaha iyo kuwa dhan labadaba sida loo fahmayo kala duwidda luqadda iyo
– Sida ardaydu ay ula socdaan qawaaniinta aasaaska ah ee luqadda qaabbilsan, ugana qayb qaataan wada hadallada iyo wada xaajoodyada iskugu qiimeeyaan bal in ay fahmeen iyo sida ardaydu ay fahamid buuxda uga turjumaan arrintaas isla markaana baadhitaan kala duwen ugu sameeyaan sidii ay u baran lahaayeen iswidhishka iyo awooddooda horumarineed ee luqad shaqaynaysa oo iswidhish ah.

Dhismaha maaddedda

Dhigista luqadda iswidhsihka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah ee sfi:gu waxay ka kooban tahay qayb gaara oo ah barashada akhriska iyo qorista iyo qayb kale oo ah afar koras oo waxbarasho.
Barshada akhriska iyo qorista
Kooraska A
Kooraska B
Kooraska C
Kooraska D

Barshada akhriska iyo qorista

Qaybtan waxbarashada ka mid ah waxa loogu talo galay dadka waaweyn ee soo galeytiga ah oo aan lahayn waxbarashada aasaasiga ee akhriska iyo qoritaanka ama waxbartay laakiin aan aqoon alif beetada laatiiniga ah. Barshada akhriska iyo qorista waxa lagu dhigayaa oo ay ku soconaysaa afka iswidhishka, laakiin waxa kale oo weliba la oggol yahay in lagu dhigo luqadda hooyo ee ardaygu uu ku hadlo ama luqad kale.

Hadefka laga leeyahay waxbrashada marka laga hadlayo barshada akhriska iyo qorista

Ardaygu waa in uu
– fahmaa sida qoraalku farriinta u gudbiyo iyo sida luqaddu ay u dhisan tahay,
– ku isticmaali karaa luqadda xidhiidhada kala duwen,
– ku dabbaqi karaa qawaaniinta ugu caadisan ee sida loo qoro luqadda,
– isticmaali karaa akhriska iyo qoritaanka si uu u barto, una fahmo oo tacbiirna uu u bixin karo,
– in uu ogaadaa oo uu fahansanaadaa sida loo barto luqadda horena loogu mariyo istaraatajiyo yaryar oo ku saabsan barshada akhriska iyo qorista ujeeddooyinka kala duwen.

Kooraska A

Koorasku wuxu gacan ka geysan doonaa sidii hore loogu marin lahaa awoodda ardayga ee xidhiidhinta hadalka iyo fahanka uguna isticmaali lahaa luqadda xidhiidho kala duwen. Marka taas la eego ayaa arrimaha luqadda la xidhiidha waxa lagu dhaqmaa siyaabo kala duwen. Qoraaladda iyo wada hadalladu waxay ka yimaaddaan oo ay ka bilaabmaan danta ardayga, shuruudaha iyo baahiyaha. Koorasyadu waxay keenayaan sidii si qoto dheer leh loogu baran lahaa luqadda iyo sidii istaraatajiyo kala duwen oo barashada ah loo isticmaali lahaa, sida qalab fudub oo loo adeegsado barashada iyo is gaadhsiinta.

Hadefka la doonayo in ardaydu ay gaadhaan ka dib marka uu dhamaado kooraska waxbarashadu

Ardaygu waa in
– uu fahmi karaa faraqa u dhaxeeya hadalka iyo luqadda qoran,
– uu af ahaan ku xidhiidhin karaa xaaladaha fudud,
– uu si fudud u fahmi karaa, luqadda lagu hadlo,
– uu af ahaan si fudud ugu sharraxi karaa aqoontiisa iyo waayo aragnimadiisa,
– uu turjumi karaa oo uu isticmaali karaa dhowr farriimood oo qoraal ah
– isla markaana ogaadaa oo la socdaa sida luqadda loo barto ee loo adeegsan karo qalabka la adeegsado ee fudud.

Summadaha shahaadedaha ee kooraska A

Summadaha shahaadedda Gudbey

– Ardaygu wuxuu la socdaa tilmaan fudud oo afka ah, iyaga oo taageero helaya.
– Ardaygu wuxu ka qayb qaataa oo uu sameeyaa fahanka wada hadalka fudud ee ku saabsan maaddooyinka maalmeed ee caanka ah.
– Ardaygu wuxu kaga sheekeeyaa af ahaan, si la fahmi karo iyo xidhiidh gaar ah oo maaddeda caanka ah.
– Ardaygu wuxu maareeyaa dhowr xaaladood oo maalintii dhaca kuwaas oo la qoro.
– Ardaygu wuxu tusaale ka bixiyaa sida ay u socoto barashada luqaddiisa uu baranayo.
– Ardaygu wuxu isticmaalaa qalab la adeegsado oo fudud si uu u barto oo u xidhiidhiyo.

Summadaha shahaadedda Aad u Gudbey

– Ardaygu wuxu si madax bannaani ah ula socdaa tilmaan fudud oo afka ah.
– Ardaygu wuxu ka qayb qaataa oo ay sameeyaa fahanka wada hadalka maalmeed ee maaddooyinka caanka ah.
– Ardaygu wuxu si af ahaan ah kaga sheekeeyaa, si la fahmi karo iyo xidhiidh gaar ah oo ku saabsan maaddeda caanka ah.

Kooraska B

Koorasku wuxuu caawinayaa sidii ay ardaydu hore ugu marin lahaayeen awooddooda xidhiidhinta xagga hadalka iyo qoraalka. Qoraaladda iyo wada hadalladu waxay ka yimaaddaan danta ardayga, shuruudaha iyo baahiyaha. Nolosha shaqa maalmeedka iyo bulsho ee iswidhishku waxay noqon kartaa meel wax laga bilaabo. Awoodda wax qeexidda iyo ka turjumidda qofku wuxuu bartay ayaa hore u maraysa, sida awoodda ka faa'ideysiga qalabka fudud ee la adeegsado.

Hadefka la doonayo in ardaydu ay gaadhaan ka dib marka uu dhamaado kooraska waxbarashadu

Ardaygu waa in
– uu af ahaan iyo qoraal ahaanba ku xidhiidhin karaa xidhiidh maalmeedka,
– uu si fudud u fahmi karaa, luqadda lagu hadlayo iyo qoraalada fududba,
– uu sharraxi karaa aqoontiisa iyo xirfadahiisa isla markaana tacbiir ahaan ku barbar dhigi karo nolosha Iswidhan,
– uu tijaabin karaa oo uu siyaabo kala duwenna uga faalloon karaa barashada_iswidhishka isla markaana,
– uu isticmaali karo qalabka fudud ee la adeegsado si uu wax u barto una xidhiidhiyo.

Summadaha shahaadedaha ee kooraska B

Sumadaha shahaadedda Gudbey

– Ardaygu wuxu si isdaba joog ah dib uga sheekeeyaa waxyaabaha muhiimka ah ee tusmadu ka kooban tahay, si hadal cad oo waaddax ah oo ku saabsan maaddo caan ah
– Ardaygu wuxu af ahaan si qeexan ugaga warramaa oo una wargeliyaa wax aad u caan ah.
– Ardaygu wuxu warbixin si la fahmi karo dib ugu sheegaa qoraal maalmeedka.
– Ardaygu wuxu noocyo wada hadal oo kala duwen kaga qayb qaataa xidhiidh maalmeedka ardayda.
– Ardaygu qoraal ahaan ayuu wax ku xidhiidhiyaa, tusaale ahaan iyaga oo adeegsanaya qoritaanka farriimo fudfudud.
– Ardaygu wuxu ka faaloodaa waxbarashadiisa.

Summadaha shahaadedda Aad u Gudbey

– Ardaygu wuxu fahmaa oo uu hadal ahaan dib uga sheekeeyaa tusmada ku saabsan maaddo caan ah oo ay yaqaannaan.
– Ardaygu wuxu si cad oo waaddax ah uga sheekeeyaa farqi yar oo gaar ah oo ku saabsan maaddo gaar ah.
– Ardaygu wuxu si firfircoon uga qayb qaataa noocyo wada hadal oo kala duwen.
– Ardaygu wuxu wax ku xidhiidhiyaa qoraal ahaan, tusaale ahaan isaga oo qaab sharraxaadda u samaynaya.

Kooraska C

Koorasku wuxuu caawinayaa sidii hore loogu marin lahaa aqoonta ardayda ee luqadda iswidhishka odhaah ahaan iyo qoraal ahaanba. Qoraaladda iyo wada hadalladu waxay ka yimaaddaan danta ardayda, shuruudaha iyo baahiyaha. Xitaa awoodda is barbardhigga ayaa taas ka mid ah. Nolosha shaqa maalmeedka iyo bulsho ee iswidhishka iyo isbarbardhigga waddamada kale waxay noqon kartaa meel wax laga bilaabo. Awoodda wax qeexidda iyo ka turjumidda qofku wuxuu bartay ayaa hore u maraysa, sida awoodda in laga faa'ideysto qalabka fudud ee la adeegsado. Natiijada iyo qorshaha la xidhiidha waxbarashooyinka qofka u gaarka ahi waxay ka mid tahay qayb muhiim ah.

Hadefka la doonayo in ardaydu ay gaadhaan ka dib marka uu dhamaado kooraska waxbarashadu

Ardaygu waa in

– uu af ahaan iyo qoraal ahaanba wax ku xidhiidhin karaa xaaladaha kala duwen ee ardayga la xidhiidha,
– uu fahmi karaa hadalka xaaladaha kala duwen iyo qoraallada kala noocyada ah,
– uu sharraxi karaa aqoontiisa iyo xirfadahiisa ku saabsan luqadda, nolosha shaqada iyo dhaqanka isla markaana barbardhigi karaa xaaladaha kala duwen ee ka jira Iswidhan iyo
– uu isticmaali karaa istaraatajiyooyin kala duwen oo ah sidii uu u baran lahaa luqadda iswidhishka, una qorshayn karo waxbarashadiisa adeegsanna karo qalabyada muhiimka ama saxda ah ee la adeegsado.

Summadaha shahaadedaha ee kooraska C

Summadaha shahaadedda Gudbey

– Ardaygu wuxu fahmaa waxyaabaha muhiimka ah isaga oo si caddi ah ugaga warramaya hadal ahaan maaddo caan ah.
– Ardaygu wuxu tacbiirtiisa ku muujiyaa odhaah ahaan iyo qoraal ahaanba, si xidhiidh ah iyo si la fahmi karaba, si uu u gudbiyo waayo aragnimooyinkiisa iyo fikradaha ama si uu

wax ugu sharraxo xaaladaha maalintii, waxbarashooyinka ama xaaladaha shaqada.
– Ardaygu wuxu si caadi ah u akhriyaa una turjumaa warbixinaha iyo tilmaamaha badanaa soo noqnoqda isaga oo adeegsanaya qaab qoraal ah iyo sawirro garaafig ah, diyagraam iyo tabbeello ama jedwello.
– Ardaygu wuxu akhriyaa oo uu ka faalloodaa, qoraallada fudud, ee sheekooyinka ama sharraxaadda ee maalinlaha ah iyo mid ka mid ah qoraalka suugaanta.
– Ardaygu wuxu ka fikiraa in sida uu doonayo uu u barto siwidhishka, wuxuuna qeexaa dhowr istarataji oo u fududeeya barashada luqadda uu hadhow sii wadanayo.
– Ardaygu wuxu isticmaalaa qalabyada muhiimka ama saxda ah ee la adeegsado.

Summadaha shahaadedda Aad u Gudbey

– Ardaygu wuxu dib uga warramaa tusmada farqiyada u dhaxeeya, si xidhiidh ah, hadal qeexan oo ku saabsan maaddo caan ah
– Ardaygu wuxu tacbiirtiisa ku muujiyaa odhaah ahaan iyo qoraal ahaanba, si xidhiidh ah iyo si la fahmi karo oo woxogaana kala duwen, si uu u gudbiyo waayo aragnimooyinka iyo fikradaha ama wuxuu wax ku sharraxaa xaaladaha maalintii, waxbarashooyinka ama xaaladaha shaqada.
– Ardaygu wuxu akhriyaa oo uu ka faalloodaa qoraallada fudud ee sheekooyinka ama sharraxaadda ee maalinlaha ah iyo mid ka mid ah qoraallada suugaanta.
– Ardaygu wuxu isticmaalaa istaraatajiyo kala duwen iyo qalabka la adeegsado si uu uga guulaysto dhibaatooyinka luqadda.

Kooraska D

Koorasku wuxuu caawin doonaa sidii si qoto dheer hore loogu sii marin lahaa aqoonta ardayda ee xagga luqadda iswidhishka. Qoraaladda iyo wada hadalladu waxay ka yimaaddaan danta ardayda, shuruudaha iyo baahiyaha. Nolosha shaqa maalmeedka iyo bulsho ee iswidhishka iyo isbarbardhigga waddamada kale waxay ka iman kartaa meelaha wax laga bilaabo. Kooraskani wuxuu keenayaa aqoonta luqadda ee noocan ah si ardaydu ay u waafajin karaan luqadda dadka lagula hadlayo iyo xaaladda una isticmaali lahaayeen si klasooni ah. Ardaydu waxay isticmaalaan iyaga oo og istaraatajiyadii ay ku sii wadan lahaayeen waxbarashadooda.

Hadefka la doonayo in ardaydu ay gaadhaan ka dib marka uu dhamaado kooraska waxbarashadu

Ardaygu waa in
– uu tacbiirtiisa u muujin karaan si kalsooni ah,
– uu af ahaan iyo qoraal ahaanba wax ku xidhiidhin karaa xaaladaha kala duwen ee nolol maalmeedka shaqada, bulshada ee ardayda la xidhiidha,
– uu barbar dhigi karaa aqoonta iyo xirfaddiisa xagga luqadda, dhaqanka, bulshada iyo nolosha shaqada ee Iswidhan ta dadka waddamada kale,
– uu akhriyi karaan, ka faalloon karaa kana hadli karaa qoraalada noocyada kala duwen waana in
– uu isticmaali karaa istaraatajiyo kala duwen si uu u barto iswidhishka, una qorshayn karo waxbarashadiisa ugu horraysa una isticmaalo qalabka kala duwen ee la adeegsado.

Summadaha shahaadedaha ee kooraska D

Summadaha shahaadedda Gudbey

– Ardaygu wuxu fahmaa oo uu dib uga sheekaynayaa tusmada odhaahda iyo qoraallada ee noocyada kala duwen ah.
– Ardaygu wuxu si firfircoon uga qayb qaataa wada hadallada iyo wada xaajoodyada ku saabsan nolol maalmeedka, shaqo maalmeedka iyo bulshada.
– Ardaygu wuxu tacbiirtiisa u muujiyaa si cad oo waaddax ah oo la fahmi karo iyo qayb luqadeed oo kala duwen oo xidhiidh ah oo odhaah ahaan iyo qoraal ahaabba ah, dabadeed waxay tacbiir ku muujiyaan aragtida iyo fikradaha qofeed.
– Ardaygu wuxu akhriyaa oo uu ka faa'ideystaa qoraalada kala duwen, wuxuna ka warramaa tusmada iyo ujeeddeda.
– Ardaygu wuxu sameeyaa isbarbardhigyo u dhaxeeya waayo aragnimadiisa xagga luqadda, dhaqanka, nolosha shaqada iyo bulshada iyo ta dadka kale.
– Ardaygu wuxu ka doodaa istaraatajiyooyinkiisa xagga waxbarashada iyo doorashada qalabka la adeegsado.

Summadaha shahaadedda Aad u Gudbey

– Ardaygu wuxu fahmaa oo uu dib uga sheekaynayaa tusmada ay wax ka kooban yihiin odhaahda iyo qoraallada maaddooyinka ku saabsan, ee xitaa qayb ahaan noqon kara kuwo aan la garanayn.
– Ardaygu wuxu si firfircoon uga qayb qaataa wada hadallada iyo wada xaajoodyada ku saabsan nolol maalmeedka bulshada, shaqo maalmeedka iyo bulshada wuxuuna ka wada xaajoon karaa aragtiyahooga.
– Ardaygu wuxu akhriyaa oo uu ka faa'ideystaa qoraalada kala duwen, wuxuuna ka warramaa tusmada ay wax ka koobanyihiin iyo ujeeddeda wuxuuna qaabeeyaa u fiirsashadiisa.

Skolverket
Swedish National Agency for Education

www.skolverket.se

Faallooyin

Ku saabsan qorshaha kooraska waxbarashada ee loogu talo galay dhigista af iswidhishka ee dadka soo galeytiga ah (sfi)

Qowaaniinta lagu maamulayo dhigista af iswidhishka ee dadka soo galeytiga ah ee (sfi) waxa markii ugu dambeysay is baddel lagu sameeyey 2002/2003. Iyada oo la caawinayo macallimiinta ayey hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyadu soo qaadday qalabka taageerada: *Sfi. Kartläggning och studieplanering samt Bedömningsmaterial – Svenska för invandrare. Kurs A – D.*

Labada qoraalba waxa laga heli karaa oo lagala soo bixi karaa bogga Internetka ee Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada ee www.skolverket.se, iyaga oo ku hoos yaalla cinwaanka Waxbarashada dadka waaweyn/Dhigista af iswidhishka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah (under rubriken Vuxenutbildning/Sfi)

Qorshahan koorsaka waxbarasho ee soconayaa ilaa 1da bisha jeenaweri sannadka 2007du wuxu ka imanyaa hinddisayaasha wax lagaga baddelayo dhigista af iswidhishka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah ee lagu soo bandhigay hinddisihii golaha dawladda ee Vissa *frågor om vuxnas lärande* (hinddishii.2005/06:148)[1]:

"Muddo dheer ayey dawladdu ku hawlnayd oo ay ka shaqayneysey in ay keento oo ay soo bandhigto hinddise dadejinaya oo hore u marinaya is dhexgalka dadka soo galeytiga ah iyo bulshada iswidhishka ah. Qofka imanaya Iswidhan ayaa aqoonta luqadda iswidhishku ay u tahay arrin muhiim ah si uu si degdeg ah u sal dhigo oo uu ula qabsado bulshada iyo seyladda shaqada labadaba."

Isbaddelada qayb waxa dib looga helayaa cutubka 13 ee qaanuunka dugsiga ee (1985:1100), qayb kalena waxa laga helayaa qaraaradii ay dawladdu soo saartay ee (1994:895) ee ku saabsanaa dhigista af iswidhishka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga waxana laga akhrisan karaa bogga Internetka ee Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada, taas oo ku hoos taalla qawaaniinta iyo sharciyada. (under lagar och regler).

Isbaddelada waxa loola jeedaa oo hadefkoodu yahay in " kor loo qaado tayada, lana wanaajiyo natiijada sidaas awgeedna kor loo qaado iyada oo si buuxda loo raacayo dhigista iswidhishka sfi:ga" taas oo ah:

– in dadka waaweyn ee soo galeytiga ah ee aan lahayn aqoonta aasaasiga ah ee qoritaanka iyo akhrintu ay fursad u helaan waxbarashada noocan ah iyaga oo adeegsanaya dhigista af iswidhishka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah halkii ay ka dhigan *lahaayeen, ilaa immika,* waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn,
– in wax akhrinta iyo qoritaanka ardayga loogu dhigo luqadda hooyo ee ardayga ama luqad kale,
– in halka ugu muhiimsan qorshaha waxbarashada ee dhigista af iswidhishka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah ee (sfi), ee maanta ka mid ah waxbarashada luqadda ee iswidhishka iyo maaddooyinka la xidhiidha aqoonta bulshada, taariikhda, juquraafiga, diinta, ayaa lagu baddelay waxbarasho luqadeed oo heer sare ah,
– in sumadaha shaadedaha loo baddalay Gudbey iyo si aad ah u Gudbey iyo
– in hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyadu ay ku hawlantahay oo ay soo diyaarinayso xitaa summadaha shahaadedaha Si aad ah u Gudbey.

---

[1] *www.regeringen.se*

Barashada luqadda (barashada aasaasiga ah ee wax akhrinta iyo qoritaanka) ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah waxa loo wareejinyaa dhigista af iswidhishka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah (sfi) iyada oo laga wareejinayo waxbarashada dadka waaweyn ee aasaasig ah, taas oo la dhigo iyada oo ka mid ah xaydaanka Iswidhishka oo ah sidii luqaddii labaad ee qofka. Barashada luqaddu waxay ku soconaysaa luqadda afka hooyo ee ardayga ama luqad kale.

Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada

Inta ay leekaanayso baaxadda wax dhigista ee wakhtigu xitaa waxay noqonaysaa 525 saacadood, waxayna ugu yaraan ka koobnaan doontaa15 saacadood oo xilliga wax dhigista ah toddobaadkiiba marka laysku celceliyo muddo afar toddobaad gudohood ah, waa shuruud loo baahan yahay muddeda wax dhigistu ay socoto oo dhan. Muddeda wax dhigistu ay socoto waa la yarayn karaa haddii ardaygu uu taas dalbado degmeduna ay u aragto in arrintaasi ay waafaqsan tahay oo ay la soconanyso hadefka waxbarashada. Qaybtan waxbarashada ee khusaysa u kala horreysiinta sida alifbeetadu u kala horrayso waxa weeyi mid ka baxsan saacadaha 525 ka ah.

Degmeda oo la kaashanaysa guddida gobolka ee shaqada qaabbilsan, ayaa ka shaqayn doonta sidii ardayga dhigta af iswidhishka ee dadka soo galeytiga ah loo siin lahaa fursado uu ku tababarto luqada iswidhishka shaqada dhexdeeda iyo sidii dhigista af iswidhishka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga loo raacin lahaa hawlo kale oo firfircooni ah sida tababarka nolosha shaqada, ansaxinta, tababarka, ama waxbarasho kale. Degmedu waxa kale oo weliba ay u shaqaynaysaa sidii waxbrashada dhigista af iswidhishka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah loo sii wadi lahaa isla ardayga oo qaadanaya lacagta gunnada ee caymiska bukaanka marka la tix raaco qaanuunka (1962:381) ee ku saabsan caymiska guud iyo sidii dhigista af iswidhishka ee loogu talogalay dadka soo galeytiga ah loo raacin lahaa hawlaha kale ee firfircoonida ee lagu soo bandhigay caafimaadka saxada iyo daryeelka dadka buka. Dhigista af iswidhishka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah waxa wakhtiyada soo socda la raacin karaa shaqo qofka ay wax ka soo galaan.

Isbaddelada lagu sameeyey qaanuunka dugsigu wuxuu dhaqan gelay 1dii bishii juulaay ee 2006dii. Xeerarka ku yaalla tuduca 13 aad ee baaragaraafka 1 aad ee qaanuunka dugsiga ee qaabbilsan barashada luqadda waxa la bilaabayaa in lagu dabbaqo ugu horrayn waxbarashada bilaabmaysa ka dib 1da bisha jeenaweri sannadka 2007ka.

Marka laga hadlayo qiimaynta ayaa hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada ee (Skolverket) waxay waagii hore ku hawlanayd summad u samaynta shahaadedda Gudbey oo qudha. Summadaha shahaadedda waxa loo baddelayaa Gudbey iyo Si aad ah u Gudbey, isla markaana iyada oo la adeegsanayo awoodda iyo oggolaansha Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada ayaa la baddelay, ayaa hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyadu waxay ka shaqaynaysaa summadaynta shahaadedaha ee labada marxaladoodba. Xeerarku waxay ku yaallaan baaragaraafyada 15aad iyo 16 aad ee qaraarka ku saabsan dhigista af iswidhishka loogu talo galay dadka soo galeytiga ah ee soconaya laga bilaabo 1da bisha diisambar ee 2006.

Waxa salka u ah iyo shaqada qorshaha kooraska waxbarashada

Shaqada ay bixisay Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada waxa ku cad in dhigista af iswidhishka loogu talo galay dadka soo galeytiga ah ay ugu horrayn ahaato waxbarasho luqadeed oo qiimo leh. " Qorshahan cusub ee kooraska waxbarashada ee dhigista af iswidhishka loogu talo galay dadka soo galeytiga ahi waa in ay ka bixisaa sawir muujinayaa isbddelka muhiimka ah ee ku aadan waxbarashada luqadda ee qiimaha leh" (waxa laga soo qaatay (Shaqada ay bixisay Hey'adda dawliga ah ee qaabbilosan waxbarashada dugsiyada ee ah in laga soo shaqeeyo qorshe cusub oo kooras waxbarasho oo ah dhigista afka iswidhishka

ee loogu talo galay dadka soo galeytiga iwm). Waxbrashada waxa xitaa laga helayaa aqoon ku saabsan sidii loo fahmi lahaa bulshada iswidhishka. Qoraalkan hinddisaha ah dawladda waxay ku qortay:

”Luqadda iyo dhaqanku aad ayey iskugu dhowyihiin oo way isku xidhan yihiin. Dhammaan dhigista luqadaha waxa ku jira oo ka mid ah qoraallo ku saabsan bulshada iyo dhaqanka luqadaha markaas taagan ee lagu hadlaa halka y ka soo baxaan sida aqoonta luqadaha ee ah aqoonta ku saabsan waddanka lays weydiinayo.

Isla qoraalka xitaa waxa lagu sheegayaa in ay faa’iido weyn ay u leedahay qofka haddii waxbarashada luqaddu ay ka timaaddo nolol maalmeedka iyo dhigista luqadda iswidhishka oo faa’iido leh lala xidhiidhin karo waxbarashada xirfadda luqadda. Arday badan ayaa leh aqoon xirfadeed iyo xirfado ay kala yimaadeed waddamadoodii isla markaana qeexi karaya arrimahaas fahmayana sidii tababar loogu smayn lahaa looguna dabbaqi lahaa bulshada iswidhishka, taasina waxay keenaysaa in aqoonta iyo waayo aragnimada deg deg loo gaadhsiin karo nolosha shaqada ee qofka iyo xaaladaha xirfaddaba.

Hey’adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada

Macallimiintu waxay leeyihiin madaxbannaani weyn oo ay ku doortaan xaqiiqooyinka iyo hababka ama nidaamyada, si ay u dheelli tirmaan shuruudaha kala duweni. Ka sakow in dhigista af iswidhishka ee loogu talo dadka soo galeytiga ah ee (sfi) ay lahaato hadef cad oo qeexan marka laga hadlayo waxbarashada xagga luqadda, ayaa sobobo kale oo dheeraad ah loo sameeyey si kor loogu qaado warbixinta bulshada si warbixinahaasi ay u dhaqan galaan sida ugu dhakhsaha badan leh isla markaasna warbixinahaas loogu bixin karo luqadda afka hooyo. Intaas waxa dheer in warbixinta la xidhiidha arrimaha bulshada ay degmooyinku ka mas’uul yihiin iyo in dhammaan dadka dhawaanta yimid ay xaq u leeyihiin kaalmo hordhac ah oo qofka u gaar ah wakhtiga ugu horreeya gudihiisa ee ay dalka Iswidhan.

Shaqada qorshaha kooraska waxbarashada waxay Hey’adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyadu si buuxda uga faa’iideysay warbixin, sida shaqo dawladdu ay bixisay oo Hey’adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyadu ay qiimayn ku samaysay sida degmooyinku ay ugu dabbaqaan sannadka 2003 qorshayaasha kooraska waxbarashada ee dhigista af iswidhishka ee loogu talo dadka soo galeytiga ah[2] iyo tirakoobka immika taagan.[3] Shaqada lagula soconayo laguna qiimaynayo dhigista af iswidhishka ee loogu talo dadka soo galeytiga ah ee degmooyinka ayaa Hey’adda Skolveket iyada oo adeegsanaysa warqad foom su’aalo ah oo bogga Internetka ku jirta ay la xidhiidhaa maamulayaasha (sfi):ga ee dhammaan degmooyinka dalka oo dhan. Weliba waxa waraysiyo laga qaaday afar degmo.

Wada shaqayanta lala sameeyey maamulka seyladda shaqada (AMS), Hey’adda is-dhexgalka dadka, Hey’adda socdaalka, Hey’adda qaabbilsan horumarinta dugsiyada iyo degmooyinka iyo gobolada Iswidhan iyaga oo ku jra xaydaanka *Överenskommelse om utveckling av introduktionen för flyktingar och andra invandrare* ayaa weliba gundhig loo sameeyey shaqada. Gundhiggaasna waxa ka mid ah in Hey’adda Skolverket iyo AMS ay ka wada xaajoodeen baahida loo qabo aqoonta iswidhishka marka laga hadlayo xaaladda shuruudaha looga baahan yahay aqoonta luqadda ee lagu xidhayo loogana baahanyahay seyladda shaqada iyo sidii hore loogu marin lahaa wada shaqaynta arrimahani.

Ayaa loo oggolyahay in uu dhigto Sfi? (vem får studera inom sfi?)

Xadka da’da ee loo oggolyahay in uu qofku kaga ka qayb qaato dhigista sfi:gu waa 16 sano. Laakiin degmooyinku waxay u oggolaan karaan qofka sidiisaba xaqa u leh in uu ka qayb qaato waxbarashada sfi, halkii uu ka bilaabi lahaa waxbarashada dugsiga sare, haddii qofku

---

[2] *Waxbarasho tayo leh- qorshayaasha –sfi:ga, fayl lambarka* 75-2006:835

[3] *Natiijadii waxbarashada ee* 2006- *Heer qaran. Lambarka warbixinta* 274

uu taasi codsado uuna ka tirsan yahay kooxda dugsiga sare ee loo dan leeyahay. Dadka qaar ayey caadi u tahay in ay dhigtaan dugsiga sare, qaar kalena waxay doonaan in iswidhishka ay ka bartaan iyaga oo ku jira waxbarashada sfi. Qiimaynta sheegaysa nooca dugsiga ee aad u habboon waxay ku caddayhay baahida qofka iyo shuruudaha loo baahan yahay.

Degmeda ayaa mas'uul ka ah in dadka ay ku soo dhaweyso waxbrashada sfi si firfircoonna uga shaqayso sidii loo gaadhi lahaa dadka xaqa u leh sfi kuna dhiirri geliso in iyagu ay ka qayb qaataan waxbarashada. Haddii qof doonaya in uu ka qayb qaato dhigashada sfi:gu uu shaqeeyo, degmeda ayaa kala tashanaysa shaqo-bixiyaha iyo wakiil hoosaadka shaqo bixiyayaasha sidii ka qayb galka waxbarashadu ay u qabsoomi kari lahayd. Waxbarashadu waa mid bilaash ah, laakiin kharashyo yaryar oo gaar ah ayaa la oggol yahay in laga qaado ardayda. Waxbarashadu waxay ku bilaabmi kartaa muddo saddex bilood gudohood ah, oo haddii uu qof ka bilaabo kooras waxbarasho sfi:ga ayaa qofkaasi wuxu xaq u leeyahay in uu si buuxda ula socdo kooraska. Waxa taas ka reebban haddii ardaygu ka faa'iideysan karo waxbarashada ama qofku aanu samayn horumarkii loo baahnaa.

Wax ka barashada dhigista af iswidhishka ee loogu talo dadka soo galeytiga ah ee sfi:ga

Waxbarashada sfi:gu waxay siinaysaa qofka weyn ee aan lahayn aqoonta aasaasiga ah ee luqadda iswidhishka fursado, iyada oo ka baxsan shuruudihiisa kala duwen iyo baahida iyo hadefka qofeed ee uu qofkaasi hore u marin lahaa awoodda xidhiidhka afeeka iyo qoraalka ee af iswidhishka ee nolol maalmeedka xagga bulshada, nolosha shaqada iyo waxbarashada.

Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada

Kala horreysiinta sida alifbeetadu u kala horraysaa waxay socon kartaa ilaa inta dadka waxbarashadoodu ay gaaban tahay aanay wax u akhriyi karayn ama wax u qorayn sida qofka kale ee wax qori karaya ama akhriyi karaya isla markaana luqad ama af kale wax ku qora.

Waxbarashadu waxay koobeysaa in qofku waayo aragnimo u yeesho sidii ay u noqon lahayd mid wax ku ool ah una horseedi lahayd hadefkii loo dan lahaa. Waxbarashooyinka gaar ahaaneed waxay dhammaystiri karaan waxdhigista sida waxbarashooyinka kale, tababarka, shaqada ama baxnaaninta. Arrimahaasi marka la eego waxbarashada waa in la qorsheeyaa si dhibaato la'aan ay u raaci karaan oo ay ula socon karaan hawlaha noocan oo kale ah. Kala horreysiinta sida alifbeetadu u kala horraysaa waa in ay isku mar la qabsoontaa waxbarashooyinka sfi:ga isla markaana socataa ilaa inta uu socdo wakhtiga sfi:gu, maaddaama barashada afku ay tahay dariiqo, taas oo ay tahay in wakhti iyo meel loo helo natiijada iyo xoojinta aqoonta.

dhigista af iswidhishka ee loogu talo dadka soo galeytiga ah waxa loogu talo galay dadka wata ujeeddooyin waxbarasho oo kala duwen isla markaana guud ahaan ku kala duwen marka laga hadlayo, tusaale ahaan. Aasaaskii hore ee waxbarashada qofka, waayo aragnimadii nolosha, xirfadda iyo da'da. Shuruudda ah isbedbeddelka iyo la qabsashada baahiyaha kooxaha iyo dadka gaarka ahi waa mid weyn. Waxaana weeyi tusaale ahaan; in ardaydu ay gaadhi karaan ujeeddooyinkooda iyaga maraya waddooyin kala duwen iyo koorasyada waxbarasho ee sfi:ga.

Wada shaqaynta ka dhaxaysa barayaasha iyo shaqaalaha kale, tusaale ahaan xafiiska xidhiidhka shaqadu waa mid muhiim u ah sidii waxbarashada luqadda loo waafajin kari lahaa baahida soo socota. Sidaas awgeed ayey muhiim u tahay in waxbarashada la qorsheeyo iyada oo lala tashanayo ardayda isla mrakaana waa in qorshaha la diiwaangeliyaa. Arrin taasi caawinaysaanaa waxa weeyi tusaale ahaan; qorhayaasha dadka u gaarka ah, kuwaas oo marka loo baahdo dib loo eegi karo. Faahfaahin intaasi dheeri waxay ku taallaa oo laga akhrisan karaa qoraalka ay leedahay Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada ee *Individuell studieplan, individuell kurs och intyg i kommunal vuxenutbildning* Sidoo kale waxa laga

helayaa warbixinta Hey'adda Skolverket ee Intyg. Labada warbixinoodba waxa laga soo min guurin karaa bogga Internet ee Hey'adda Skolverket ee www.skolverket.se iyada oo ku hoos taalla cinwaanka (Vuxenutbildning) waxbarashada dadka waaweyn.

Dhigista af iswidhishka ee loogu talo dadka soo galeytiga ah ee (sfi) waxa lagu sifayn karaa ama lagu yaqaannaa in ardadu ay hore u mariyaan aqoonta luqadda ee waddanka lagaga hadlo. Waxbarashada waxa loola jeedaa in ardaydu ay dareemaan niyadda iyo xiisaha ay ku baranayaa luqadda iswidhishka oo ay awoodaan kuna isticmaali karaan luqadda xaaladaha kala duwen isla markaana luqad ahaan labadaba uga faa'ideystaan oo hubiyaanna waxa ay ka kooban tahay waxa luqaddu ay gudbinayso ee ay xidhiidhinayso. Iyada oo la adeegsanyo waxbrashada ayaa hore loo marin karaa dhinac kasta, awoodda xidhiidhinta ee lagu dhisay awoodda cilmi iyo xirfadeed ee kala duwen. Awoodda cilmi iyo xirfadeed ee lagu dhisayo luqad dhan oo xidhiidhsan oo is haysata ayaa hore loo marin karaa, awoodda xidhiidhintana waxa dabadeed si aad u fiican loo waafajin karaa xalladda iyo guddoomaha. Marka aqoontooda luqadu aanay ahayn mid ku filan ayaa ardaygu wuxu u baahan yahay in uu taas raaciyo isaga oo adeegsanaya istaraatajiyad dib u habayn ah, erayada isku macnaha ah, su'aalaha iyo luqadda jidhka iyo gacmaha layskula hadlo. Awoodda cilmi iyo xirfadeed xitaa waxa ka mid ah awoodda karitaanka habka luqadda sida shedidda, laxniga codka ee jumladda, qawaaniinta samaynta jumladaha, erayada, dhismaha erayada, naxwaha iyo hingaadda. Muhimadda si fiican ugu dhawaaqidda erayada ayaa lagu tuntuunsanayaa qorshahan koraska waxbarashada.

Awood cilmi iyo xirfadeed oo kale waxa weeyi ogaanshaha sida ay u socoto barashada luqaddu. Waxbarashadu waxay ardayga siinaysaa fursad uu hore ugu mariyo awooddiisa uu ku isticmaalayo istartajiyada kala duwen ee barashada, labadaba marka laga hadlayo gaar ahaan iyo la shaqaynta dadka kale si ay dhakhso u noqoto, iyada oo la adeegsanyo dadka ku wareegsan ee hadlaya iyo iswidhishka qoran, ayaa qofku uu wax qorshayn karaa isla markaana uu hore u sii marin karaa aqoontiisa luqadda iswidhishka. Meelaha laga bilaabo waxdhigista iyo wax barashadu waa luqadaha afka hooyo ee kala duwen ee ardayda, aqoonta luqadaha ee kale, waayo aragnimada xirfadaha, aasaaska waxbarashada iyo danahooda iyo baahida.

Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada

Awoodda lagu muujiyo isku mid ahaanshaha iyo kala duwenaanshaha u dhaxeeya waayo aragnimadooda ay u leeyihiin luqadda iyo dhaqanka iyo luqadda iswidhishka iyo dhaqamada ay ardaydu kula kulmaan Iswidhan ayaa ku jirta waxbarashada oo waxna ka taraysa is fahamka dhaqamada kala duwen iyo sidoo kale awoodda cilmi iyo xirfadeed ee dhaqamada.

Waxbrashada ujeedadeedu weliba waxa weeyi in ay siiso warbixin iyo hoggaamin u suurtagelisa qofka wax baranayaa in uu qorshaysto waxbarashadiisa uu sii wadanayo iyo shaqada.

Qiimayn (bedömning)

Sidii waayadii hore ayaa laba marxaladood oo qiimayn ah lagu isticmaalayaa sfi:ga. Kuwaas waxa lagu magacaabaa Gudbey iyo si aad ah u Gudbey. Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyadu waxay ku hawlantahay summadaha labada marxaladood, marka la eego faraqa u dhaxeeya waagii hore. Qiimayntu waxay ka bilaabmaysaa shanta awoodood ee wax lagu qabto sida fahanka maqalka, fahanka akhrinta, xidhiidhka wada hadalka ah, soo saaridda hadalka iyo farsamada qoritaanka, Istaraatajiyada, luqad tayo leh iyo xirfado dhaqama badan leh ayaa weliba ku jira. Warbixin intaas dheer waxay ku taal oo laga akhrisan karaa *Bedömningsmatreial – Svenska för invandrare. Kurs A-D.*

Taageerada qiimaynta loo adeegsan karaa waxay weliba ku taallaa imtixaanka tijaabada

waddanka oo dhan ah ee la ansaxiyey, taas oo ay tahay in macallimiintu ay adeegsadaan si qiimayntu ay u noqoto mid dhan sida ugu suurtagalka badan leh waddanka oo dhan. Hadefka laga leeyahay tijaabada qaranku maaha in ay noqoto imtixaan tijaabo ah, ee waxay noqonaysaa qayb ka mid ah aasaaska qiimaynta ee macallimiinta. Warbixin ku saabsan *Det nationella provets funktion och status inom sfi* ayaa la soo saaray bishii diisambar ee sannadkii 2006dii. Warbixintu waxay ku dhisan tahay natiijadii ka soo baxday baadhitaankii la sameeyey sannadkii 2005tii ee ahaa tijaabadii qaranka ee qoraalkii qiimaynta ee sfi:ga, waxana lagu saleeyaa waraysiyadii lala yeeshay maamulayaasha, macallimiinta iyo ardayda wax ka barata toban meheradood oo kala duwen. Warbixintaas waxa laga dalban karaa ama laga soo min guursan karaa bogga Internetka ee Hey'adda qaabbilsan waxbarashada dugsiyada ee www.skolverket.se iyada oo ku hoos taalla cinwaanka "under rubriken Publikationer".

Faallooyinkan loogu talo galay qorshaha kooraska ee sfi:ga dib ayaa loo eegi karaa loona dhammays tiri karaa marka loo baahdo.

Skolverket
Swedish National Agency for Education

www.skolverket.se